Guddi ayaan u saarney

Garwaaqsiga khudbadii Madaxweynaha

Janaayo 14,2012
Afeef:

1-Taageerada qof kasta oo reer Soomaliland ahi u fidinayo ciidamada Qaranka iyo gooni isku taaga Soomaaliland waa mid buuxda oon gorgortan iyo labaclabac midna laheyn.

2-Sheegist dhaliilaha dawlad kasta oo ka jirta Soomaliland waa hawl u taala dadweynaha Soomaliland iyo xisbiyada Mucaaridka .Dhaliishu waa toosin iyo tilmaamid ee maaha colaad.Dawladuna waa inay ku dadaashaa wax ka qabadka dhaliilahaa.

Duqii gaadhiga kaxeeyey
Markii guuruhu bilaabmay
Dadkoo guradiisa saaran
Loollina guudkeed maraaya
Waa kii gam'ay ee lulooday
geerkiyo shookaan biriigga
waakii gacmahaba ka qaaday
markuu gebi dheer ka tuuray
rakaabkii biday garaadku
markuu goonyaha ka daatay
waa kii isagoo gamaarsan
shilkaa **guddi culus** u saaray!!!
Abwaan Xasan Daahir Weedhsame

Si loo fahmo guulaha u Maxadweyne Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo ku sheegay khudbadiii sannadlaha aheyd ee uu ka hor jeediyey labada gole maanta (Sabti 14,Janaayo 2012),ayaa waxaan u saarney guddi kala shaandheeya. Gudidaasi markii hore waxay dhageysteen qodobada uu ka duulayo uuna cuskadey madaxweynuhu si uu u cadeeyo hadafkiisa ku aadan hawlgalada ay xukuumadu gashey si ay guul horumarineed u soo hooyaan.Gudidaasi waxay si xeeldheer u dhuuxeen qodobadaa ay ku salaysan yihiin hanaanqaadka hawlgadalaasi. Waxaanu madaxweynuhu isagoo ka hadlay qodobadaa uu yidhi sidan:

-Markaan eegay diidmadeydii shirkii Dubur
-Markaan eegay baraarujintii HornCabel TV
-Markii uu i xasuusiyey HornCable TV dhaartii aan ummadan u galay
-Markii aan eegay dayacnaanta Kulmiye
-Markii aan eegay shaqo ka eriga Marwo Ismahaan Yuusuf Cali
-Markaan dib u xasuustay shaqo u diididii Marwo Aamina Waris
-Markaan eegay tiro beelka wariyayaasha la xidhay intaan xilka hayey
-Markaan eegay dilkii xukuumadeydu u geysatey dadweyinihii la rarayey
-Markaan eegay korodhka dakhliga madaxtooyada (dakhligii dekada Berbera Cali Xoor dartii)
-Markaan eegay dhayalsigii xukuumada Kulmiye ee shirka Taleex

Gudidii aan u xilsaarney arintaa waxay si guud u ansixiyeen dhamaan qodobadaasi oo ka falcelinaya xaalada dalka.Waxaanay gudidaasi si kooban u soo bandhigeen in dawlada Kulmiye hogaanka u hayo ay horumar la taaban karo ka samaysey meel badan oo hoos ku xusan.Marka la soo koobo si fudud oo bulshadu fahmi kartana loo qoro waxay u dhigmayaana sidan:

Wuxuu yidhi madaxweynuhu :

1-Waxaanu qabaney in wadooyin dad dhisteen aanu xadhkaha ka furnay,waxaanse wali noo suurtogalin wadada wadnaha Hargeysa ee hor marta madaxtoyada oo Engineer Jiciir sugayo dad dhisa si uu noo soo wargaliyo ka soo qaybgalka furitaankeeda.Aniga iyo dhamaan wasiiradaba way dhibtaa markay arkaan dayacnaanta wadadaa ka muuqata iyo sida indhahaygu mar kasta ugu dhacaan

2- Hoolka dawlada hoose ee Gabiley in ka badan dhawr jeer ayaan xadhiga ka go'aynay. Dadka furay xataa aniga ayaa ka mid ahaa oo markayga xadhiga ka gooyey,sidoo kale ayey mar kale xidhmo wasiiro ah oo uu hogaaminayo madaxweyne ku xigeenku xadhiga ka gooyeen.Gobolka Gabiley dadkooda ayaanu ku amaaney sida ay dhakhtarka u dhisteen, inkastoo aanay wali noo suurtogalin inaanu shaqaaleyno dhakhaatiir iyo kalkaaliyaal caafimaad oonu ugu balan qaadney, waanuse ku gudajirnaa fulinta balantaa.

3-Wadada Dilla ilaa Boorama dadkaanu dhirigalinay inay ka qayb qaataan.Waxaa dhiirigalintayadaa dhageystay shirkado iyo dadweyne badan.Si fiican ayeyna hawshaasi u socotaa oo waxaanu u diyaar garoobaynaa ka qayb galka furitaankeeda haddey dhamaato intaanu maamulka hayno.

4-Cadaalada dalka ayaa aad looga cabaneyey.Dhawr jeer ayaanu isbadalo ku samaynay wasiirada iyo garsoorayaasha ka hawlgala wasaaradaa. Dhawaana waxaanu xilka u dooranay garsoorayaal dan yarta cabudhintooda loo tababeray una magacaabney degmooyinka iyo gobolada dalka oo dhan.

5-Waxaa aad looga cabanayey cabudhinta saxaafada xorta ah.Intaanu xilka haynay culayska saaran saxaafada ayaanu ka qayb qaadaney kordhinteeda ,Hase yeeshee waxaanu hor keenaa qaarkood maxkamad.Dhawaana waxaan ka tashanaynaa sidaanu ka yeelanayo kuwa xidhan oo ay u danbeeyeen Yuusuf Cabdi Cali (Royal TV) iyo Maxamed Cumar (Wargeyska Saxafi). Shaqaalaha HornCable abaalweyn baanu ugu haynaa sidii ay noola hawlgaleen ku guuleysiga madaxtinimada,hase yeeshee iminka Kulmiye olole kuma jiro,taana in la ogaado waa arin loo baahan yahay.Waxaanu mar kasta garwaaqsanahay sidaanu ugu hawlgalnay qoraaladii Geeljire oonu wasiirnimo ku siinay iyo shaqaalihii idaacadii Horyaal oonu ka hawlgalinay wasaarada warfaafinta. Saxaafada xorta ihi waa ta suurtogalisay inaanu kursiga madaxweynaha gacanta ku dhigno,waananu taageersanahay.

6- Si aanu u dardar galino horumarka gobolada dalka ayaanu isbadal hor leh ku samaynaynay maamulada gobolada.Tiraba saddex gudoomiye ayaanu u magacawnay maamulka gobolka Gabiley,sidoo kale Saddex gudoomiye ayaanu u magacawnay gobolka Awdal.Halka isbadalo kale ku samaynay gobolada kale ee dalka.Dadku ha arkaan wajiyo cusub oo balanqaadyo cusub la yimaada.

Khudbada madaxweynaha oo aad u dheerayd kuna kaliftay hogaamiyaasha xisbiyada mucaaridka inay seexdaan oo khuuradoodu madaxweynaha dhawr jeer ku kaliftay inuu ku margado gudbinta warbixinta ayaa aanu dib idiinku soo gudbin doonaa inta hadhsan.

Qaybtii Labaad.
Janaayo 18,2012

Afeef:

1-Taageerada qof kasta oo reer Soomaliland ahi u fidinayo ciidamada Qaranka iyo gooni isku taaga Soomaaliland waa mid buuxda oon gorgortan iyo labaclabac midna laheyn.

2-Sheegist dhaliilaha dawlad kasta oo ka jirta Soomaliland waa hawl u taala dadweynaha Soomaliland iyo xisbiyada Mucaaridka .Dhaliishu waa toosin iyo tilmaamid ee maaha colaad.Dawladuna waa inay ku dadaashaa wax ka qabadka dhaliilahaa.

Kala shaandheyn iyo falanqeyn dheer dabadeed, waxaanu guddi ahaan qornay in ka mid ah nuxurka ay xambaarsaneyd khudbadii madaxweynaha mudane Axmed Maxamed Maxamuud “Siilaanyo”.Halkana waxaanu ku soo bandhigaynaa intii ka hadhsaneyd khudbadii madaxweynaha oo dheerayd sida uu tilmaamayo muuqaalka sawiradan.

Saddexdi Xisbi: Qolo iska sheekaysatey iyo qolo hurdo miciin biday.

Khudbadii oo u qoran si fudud oo dadweynuhu fahmi karo,wuxuu yidhi madaxweynuhu:

7-Bilicda magaalo madaxda: Inkastoo aan hore ugu dhawaaqney afartankii cishaba in maalin loo qoondeeyo nadiifinta dhamaan degaanada Soomaaliland,arintaasi may noqon arin aan fulinteeda awood u yeelanay.Hase yeeshee waxaanu garab istaagnay mudane Jiciir labada shirkadood ee uu siiyey qandaraaska nadiifinta magaalada oo waxqabad la’aantoodu muuqato oo kaliya marka roob da’o ee wadooyinku googo’aan biyaha waayey marin ay maraan dartood.Guddi baanuse u saarney waqti ku qaata ka wada hadalka arintaa.

8-Shaqo la’aanta : Ajaanibka shaqada dadkeenu qaban karo waanu saarney si shaqadaasi dadkeena ugu soo banaanaato.Dawladii Ina Siyaad meelaha ay ku wanaagsaneyd laga tagi maayo,sidaa darteed ardeyda dugsiyada sare ka soo baxda waxaanu u diraynaa inay soo galaan hal sanno oo shaqo qaran ah.Guddi ayaanu u saarney si arintaa looga wada hadlo fulinteeda.

9-Khasnada Dawlada :Waxaanu dhamaan hawlwadeenada dawlada oo iskugu jira wasiiro,agaasimayaal iwm ku wargalinay inay dakhliga soo gala dhamaan ku shubaan oo

uu ku xeroodo khasnada guud ee Wasaarada Maaliyada,inkastoo qaar xogaa leexiyeen haddana waanu toosinay.Waa bani'aadamoo qalooc laga waayi maayo laakiin may aheyn u badheedhid.Waxaanu hawlgalinay hantidhawrkii qaranka inkastoo aydaan muddo maqal markay qaar Kulmiye ka tirsan wax ka sheegeen.

10-Caafimaadka : Waxaanu qabaney waxyaalo muuqda oo ah dhismayaasha meelo caafimaad,tababaro aanu u fidinay shaqaalaha caafimaadka, maalgalin aanu ku samaynay xarumo caafimaad oo badan.Waxaase wali noo dhiman hawlgalinta dhakhaatiir danta guud u adeega oo danta gaar(xarumaha ay leeyihiin) aan dan yarta u dirin.Farmasiyada oo badanaya dadka lihina aanay aqoon u laheyn dawooyinka ay iibinayaan ayaanu guddi heer qaran u saari doonaa sidii wax looga qaban lahaa.

11-Gobolada Dalka: Tirada rasmiga ah ee gobolada dalku waa lix (Maroodijeex,Togdheer, Sanaag,Saaxil,Awdal,Sool),waxaase jira gobolo kale oo gudoomiye gobol u magacawnay tiraba dhawr jeer.Guddi ayaanu u saarney soo qora sharciyeynta goboladaasi oo hor keena golaha baarlamaanka.

12-Golayaasha Sharciga: Labada gole ee guurtida iyo baarlamaanka ayaanu xidhiidh fiican la yeelanay wada shaqeyn buuxda ayaan naga dhaxeysa.Inkastoo golaha baarlamaanku ay dalka ka maqan yihiin, Afartameeyo ku dhawaad dantu ku khasabtey inay dalka dhex joogaan oo reerahooga iyo caruurahoogu degan yihiin mooyee,hase yeeshee ilaa kuwa maqan mushaharkooda oo buuxa waanu bixinaa.

Xusuusin: Golaha baarlamaanku wuxuu ka kooban yahay 82 xubnood.

13-Arimaha Dibadda: Waxaanu diyaarinay qoraal aanu ku garnaqsaneyno,dalalka dibadana ugu sheegayno inaanu Faraska ka hor marinay gaadhi faraska. Inkastoo wadamadu dhageysiga arintaa u fasiranayaan caawimo na siiyo oo dhaqaale uun ay la soo guri noqonayaan hawlwadeenada aanu u dirno gudbinta fariintaasi.Guddi ayaanu u saarney bal arintaa dib u eega gudbinteedana u hawlgala.



14-Arinta Taleex : Shir beeleed aanu taageernay ayuu ahaa waase la marin habaabiyey. Taana ma ogolin umana dul qaadaneyno.Waxaanu ku khasabanahay una hawlgalaynaa sugida xuduudaha dhamaan dalka Soomaliland,cidna ugama gabaneyno fulinta hawshaa. Waxaanu u fidinay gogol nabadgalyo cid kasta oo dadkooga wax la qabsaneysa ilaa iminka dad badan ayaa ka faa'iidaysatay oo ay ka mid yihiin Jaamac Yare, Axmed Sifir, Kayse Cabdi Yuusuf.Dhawaana waxaa la filayaa Cali Khaliif,Xaglo toosiye iyo Ismaaciil Buubaa oo ka daaley tiihii uu ku jiray.

Runtii waxaanu amaan u soo jeedinaynaa madaxweynaha Soomaaliland mudane Axmed Maxamed Maaxamuud "Siilaanyo" oo muujiyey dhiiranaan xad dhaafa marmar badana galka seefta ka siibay.Khudbadaasi waxay aheyd mid tilmaanteeda leh,bulshada reer Soomaliland-na aad ayey u soo dhaweysay.

Bahda Mareegta Farshaxan
Somaliland@farshaxan.com
www.farshaxan.com iyo www.farshaxan.org
Bahda Mareegta Farshaxan